



Aisling Discoveries
Child and Family Centre

Ideas for Parents

Parenting Techniques Farsamooyinka Waalidnimada

Natijooyin Dabiici ah

- Natijooyinka dabiiciga ahi waa khibrado si dabiici ah u yimaada, tusaale ahaan, natijooyinka dabiici ahaan uga dhasha banaan aadidda maalin qabow jiro iyadoo aan la qaadan gacan gashiyo 'mittens' waa gacmaha oo qabooba.

Natijoojin Macquul ah

- Natida macquulka ahi waa in ay si macquul ah ugu xirnaato si xun u dhaqanka. Caruurta u bandhig kala doorashada natijooyinka. Tusaale ahaan, Billy wuxu dhibayaa eyga -“Billy, eyga u salaax si naseexo leh sidan oo kale (iyadoo aad tusaayso sida haboon), hadii kale xeradiisa dib ugu celi. Kala dooro”. Natijada macquulka ah oo ka imanaysa sii wadiidda dhibidda eygu waa luminta fursadii aad kula ciyaari lahayd.

Abaalmarino/Ku-Sii-Adkeeyn

- Markii hawl la dhammeystiro abaalmarin ayaa la bixiyaa . Waxad abaalmarisaa falka ee HA abaalmarinin ilmaha. Waxa abaalmarinada qaarkood tusaale ahaan loogu soo qaadan karaa habsiin, u qoslid, dhunkasho , mudnaano gaar ah, mahadsanid, iwlml..

Iska-dhaga-tir

- Iska-dhaga-tir si xun u dhaqanka aan waxyeelo u gaysanayn ilmaha ama dad kale. Qiimo u yelidda si xun u dhanqanka qaarkiis, tusaale ahaan, camal xumo, waxay dhiirigelindoontaa dhaqan xumada aan la dooneyn.

Ka-sii-jeedin

- Haddii ilmahaagu uu camal xumo bilaabo, waxad samayn kartaa in aad taxadarkiisa/keeda ku sii-jeedisid wax kale ama waxqabad kale. Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu ka xanaaqsan yahay xirashada suunka baabuurka, waxad abaabuli kartaa tartan lagu tirinayo baabuurta midabkoodu buluuga yahay oo waddada maraya.

Xushmo iyo dhagaysi taxadar leh

Ilmahu waxay xaq u leeyihiin in si xushmad leh loola hadlo oo isla markaana loo dhageeysto si fiican. Ilmaha yar ee uu weli dhismayo rayiga uu iskaqabo/ay iska qabto, in loo dhagaysto si fiican waa lama huraan oo waxay leedahay muhiimad wayn, haddii la doonayo inay aaminaan in ay yihiin dad muhiim ah oo leh dareen iyo fikrado qiimo leh.

Tusaale ahaan., Ilmaha: “Qashinka banaanka ma geynayo adiguna uguma khasbi kartid”
Waalidka: “Waan ogahay in aanad jaclayn in aad qashinka banaanka geeysid. Ma doonaysaa in aad howshaada igaga badalatid kuwayga mid ka mid ah? Waxan banaan geynta qashinka kaaga bedelenayaa nadiifinta musqusha barkadeeda yar ‘sink’”

Kala Dood Shacuurta

- Ogeeysi ilmahaaga in aad fahmaysid dareenkooda oo ay taasina tahay “caadi”. Tusaale ahaan, “Aad baad saaxiibkaa ugu xanaaqsan tahay, waana caadi in aad sidaas dareentid. Sidee baad isaga u ogaysin kartaa?”

Xad Samayn

- Markay waalidku xad u sameeyaan ilmaha, waxay abuurayan jawi nidaamsan, oo la sii ogaan karo ilmahana dareen siinaya badbaadsanaan, caymisnaan iyo kalsooni.

Joogtayn ‘Consistency’

- Ilmahaaga war cad u sheeg. *Cadee ujeeddadaada, ka dhabe oo raahdaada, sameena wax aad tiraahdid waan samaeynaya.*

Waxyaabaha Laga Doonayo Qab Nidaamsan Ugu Diyaari

- Si loo siiyo kalsooni ay ku sii ogadaan waxaa imaan doona, ilmahu waxey u baahan yihiin rootiin ‘routines’.

Ka-Filitaan Wax Da’da U Dhigma

- Ilmahaaga waxad ka filaysid ku koob wax hadba ku haboon da’dooda. Ku dadaal in waxyaabaha aad ka fileeysid ay yihiin *macquul*.

Kala Dorasho

- Kala doorashadu waxay waalidka ka caawinaysaa baridda xirfadda qaadashada go’aan wanaagsan iyagoo isla markaas sii wada gacan ku hayanta waxqabadyada iyo nidaamka waxa ilmahoodu u samaynaya maalintii. Tusaale ahaan, “Ma waxad gashanaysaa surwaalka barafka mise abu-cumarkaaga ‘leotards’ iyo surwaal jiiinis ah oo aad ka kor gashatid?”

Ku Dayasho

- Ilmahu waxay wax ka bartaan daawashada iyo dhegaysiga dadka. Tusaale ahaan, haddii aad rabtid in ilmahaagu dadka xurmeeyo, markaad isaga ama dadka kale la hadlaaysid waa in aad isticmaasho erayada “fadlan” iyo “mahadsanid”.

Dhiirigelin iyo Muhimad Siin Waxyaabaha Fiican

- Si joogta ah u dareemiidda iyo ku amaanidda ilmahaaga dabecadooda wanaagsani waxay ilmahaaga ku dhiirigelinaysa inay si haboon u dhaqmaan. Tusaale ahaan, “Maalmahan howl wanaagsan baad qabatay oo qolkaaga si fiican ayaad u hagaajisaa. Halkaa ka sii wad shaqadaa wanaagsan!”

Talooyin kale oo wax lagu Edbiyo

Dhaqso wax uga qabo markay ilmahaagu edeb darroodaan si ay isugu xiraan edeb darada ay sameeyeen iyo abaalmarinta ama ciqaabta. Sii wad ku amaanidda iyo ku sii dhiirigelinta dabecadda wanaagsan.

- Isticmaal warqadda ‘stickerka’ si aad u sii adkaysid dabecadda wanaagsan. Samee warqadda oo abaalmarixii wanaagsan oo keliya.

- Isticmaal 'egg timer' (dhalo ay ciid ku jirto oo la foorariyay oo sidii saacado oo kale loogu qiyaaso muddada ay ukuntu ku bislaato) si aad u qiyaastid wakhtiga ganaaxa 'time-out'. Tani waxay mas'uuliyadda saaraysaa ilmahaaga. Tirada daqiiqadaha wakhtiga ganaaxu waxay ku xirantahay da'dooda. Taaale ahaan, 3 daqiiadood ayaa loo qabtaa ilmaha jira saddex sano.
- Waxad geeysaa meel xasiilan si uu ilmahaagu uga fakaro sababta isaga/iyada loo ganaaxay.
- Sida aad hadalka u oraneysid waa muhiim – xusuusnow ***cadee ujeeddaada, ka dhabee oraahdaada.***
- Ma aha waxaad sheegatay ee waa sida aad u tiri. Go'aan yeelo, lakiin naxariis lahow.

This document was created with Win2PDF available at <http://www.win2pdf.com>.
The unregistered version of Win2PDF is for evaluation or non-commercial use only.
This page will not be added after purchasing Win2PDF.